

# Imaanshaha dugsiga ee khasabka ah

## Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha

Waxbarashada ilmahaagu waa muhiim iyo imaanshaha joogtada ah ee dugsigu waxay lagama maarmaan u tahay ilmahaaga si ay u gaaraan waxbarashadooda meesha ugu wanaagsan si ay u kordhiyaan mihnadooda iyo fursadaha noloshooda. Dugsiyada dadweynaha NSW waxay si shirko ah uga wadashaqeeyaan waalidiinta si loo dhiirigeliyo oo loo taageero imaanshaha joogtada ah ee carruurta iyo dadka dhalinyarada ah. Marka ilmahaagu dugsiga yimaado maalin kasta, waxbarashadu way fududaadataa ilmahaaguna wuxuu dhisi doonaa oo adkayn doonaa saaxiibtinimada carruurta kale.

### Waa maxay masuuliyadayda sharciga ahi?

Waxbarashada New South Wales waa ku khasab dhammaan carruurta u dhaxeysa da'aha lix sanno jirka iyo waxa ka hooseeyaa ee ah da'da 17 sanno jirka ee dugsiga lagaga baxo. Xeerka Waxbarashada 1990 wuxuu u baahan yahay in waalidiintu ay hubiyaan carruurtooda jirta da'da dugsiga khasabka ah laga diiwaangeliyo, iyo inay si joogta ah dugsiga u tagaan, ama ka diiwaangashan hay'ada heerarka Waxbarashada NSW ee loogu talagalay guri wax ku barida.

Islamarka la diiwaangeliyo, carruurta waxaa looga baahan yahay inay tagaan dugsiga maalin kasta waa u furan tahay ardayda.

### Muhimada dugsiga in wakhtiga lagu yimaado

Imaanshaha dugsiga iyo wakhti ku tegida fasalka:

- waxay hubisaa in ardaydu aysan gefin nashaadka waxbarashada ee muhiimka ah ee loogu talagalay maalinta horaanteeda
- waxay caawisaa ardaydu inay bartaan muhiimada wakhti ku imaanshaha iyo waxyaalaha sida joogtada ah loo sameeyo
- waxay siisaa ardayda wakhti ay ku salaamaan saaxiibadood fasalka ka hor
- waxay yareysaa carqadala fasalka dhexdiisa.

Habsanka waxaa loo diiwaangeliyaa maqnaansho qayb ah waxaana waajiba in waalidku sharxaan.

### Ka waran haddii ilmahaygu dugsiga ka maqan yahay?

Wakhti, wakhti waxaa dhaci karta in ilmahaagu u baahdo inuu dugsiga ka maqnaado, sababaha cudurdaarka leh ee maqnaashaha ardayga waxaa ku jira kara:

- Inay jiran yihiin, ama ay qabaan cudurka caabuqa
- lahaanshaha balan caafimaad oo aan laga baaqan karin
- in looga baahan yahay inay ka qaybgalaan fasaxyada diinta ee la aqoonsan yahay
- Xaaladaha laga soo reebayo ama qoys ee degdega ah tusaale, ka qaybgalka aas.

Ka dib dugsi ka maqnaanshaha waa inaad ku hubisaa 7 maalmood gudahood inaad ku siiso dugsiga ilmahaaga af ahaan ama sharaxaad qoraal ah oo maqanaanshaha ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii uusan dugsigu kaa helin sharaxaada 2 maalmood gudahood, waxaa laga yaabaa in dugsigu kula soo xiriiro si uu kaala hadlo maqnaanshaha.

Maamulayaasha waxaa laga yaabaa inay diidaan aqbalida sharaxaada aad bixisay haddii aysan rumeysnayn in maqnaanshuhu uu yahay waxa danta ugu wanaagsani ugu jirtay ilmahaaga. Xaaladahaan ilmahaaga maqnaanshihiisa waxaa loo diiwaangelin doonaa mid aan cudurdaar lahayn. Marka tani ay dhacdo maamuluhu wuxuu kaala hadli doonaa go'aankooda adiga iyo sababihiisa.

Maamulayaasha waxaa laga yaabaa inay codsadaan shahaado caafimaad ama dukumiintiyo kale marka maqnaansho soo noqnoqdo ama mid wakhti dheer loo sharxo inay ahaayeen jiro awgeed. Maamulayaasha waxaa sidoo kale laga yaabaa inay weydiistaan ogolaanshaha waalidiinta si ay ula hadlaan dhakhaatiirta caafimaadka ee takhasuska leh si ay u helaan macluumaad si iskaashi leh loogu sameeyo qorshe daryeel caafimaad oo lagu taageerayo ilmahaaga. Haddii codsiga la diido, maamuluhu wuxuu u diiwaangelin karaa maqnaanshaha mid aan lagu qancin.

## Safar

Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay safraan inta lagu jiro fasaxyada dugsiga. Haddii safarku uu lagama maarmaan yahay inta lagu jiro dugsiga, kala hadal tan maamulaha dugsiga ilmahaaga. Codsiga fasaxa la kordhiyey waxaa laga yaabaa in la buuxiyo. Maqnaanshaha la xiriira safarka waxaa lagu calaamadeyn doonaa diiwaanka fasaxa, saa daraadeed waxaa lagu darayaa maqnaanshaha ilmahaaga ee sannadka.

Xaaladaha qaarkood ardayda waxaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan in ay isu diiwaangeliyaan fogaan wax ku barashada xiliyada safarka wixii ka badan 50 maalmood oo dugsiga la dhigto. Tan waa in lagala hadlaa maamulaha dugsiga ilmahaaga.

## Ilmahaygu dugsiga ma aadi doono, maxaan sameeyaa?

Waa inaad la xiriirtaa maamulaha sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah si aad ugala hadasho arinta oo aad caawimaad u weydiisato. Istiraatijiyadaha si ay u caawiyaan hagaajinta imaanshaha waxaa laga yaabaa inay ku jiraan u soo gudbinta kooxda taageerada iyo waxbarashada dugsiga ama ku xiriirinta ilmahaaga netwaaga taageerada haboon. Maamulaha waxaa laga yaabaa inuu sii raadiyo taageero dheeraad ah barnaamijka Xiriirka Dugsiga Guriga si loo horumariyo Qorshaha Hagaajinta Imaanshaha.

## Maxaa dhici doona haddii ilmahaygu uu sii wado maqnaanshaha aan la aqbali karin?

Waa muhiim in la fahmo in Wasaaradda Waxbarashada waxaa laga yaabaa in laga doono in talaabo dheeraad ah la qaado halkaas oo carruurta da'da dugsiga ee khasabka ahi ay leeyihiin tiro maqnaansho dugsi oo aan lagu qancin ama aan la sharxin.

Qaar ka mid ah ficilada soo socda ayaa laga yaabaa in la qaato:

- Shirarka dugsiga ee khasabka ah

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyey, adiga iyo ilmahaaga, inuu yimaado Shirka Dugsiyeynta Khasabka ah. Shirku wuxuu caawin doonaa inuu garto taageerooyinka ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu leeyahay goob saa daraadeed si ay dugsiga si joogta ah u yimaadaan. Dugsiga, waalidiinta iyo wakaaladaha way wada shaqeyn doonaan si ay u horumariyaan qorshe la ogol yahay (oo loo yaqaan masuuliyadiisa) si loo taageero imaanshaha ilmahaaga ee dugsiga.

- Codsiga Maxkamada Carruurta - Amarka Dugsiga ee Khasabka ah

Haddii ilmahaaga imaanshihiisa dugsiga uu ahaado mid aysan ku qancin Wasaaradda waxaa laga yaabaa inay codsadaan Maxkamada Carruurta Amarka Dugsiga ee Khasabka ah. Maxkamada Carruurta waxaa laga yaabaa inay amraan Shirka Dugsiga ee Khasabka ah in la qabto.

- Dacwada Maxkamada Degaanka

Shaqaalaha Wasaaradda iyo Dugsiga waxaa ka go'an ula shaqeynta si shirko ah adiga si looga hadlo arimaha ka hortaagan in ilmahaagu si buuxda uga qaybgalo dugsiga. Xaaladaha meeshii amarada dugsiga ee khasabka uu dhaco talaabo dheeraad ah waxaa laga yaabaa in laga qaado waalidiinta ee Maxkamada Xaafada. Ficilka Natiijada maxkamada wuxuu noqon karaa ku fulin ka saarida amarka adeega bulshada ama ganaaxa.

## Da'dee ayaa ilmahaygu dugsiga kaga bixi karaa?

Dhammaan ardayda New South Wales waa inay dhameystaan Fasalka 10-aad  ama wixii la mid ah. Ka dib Fasalka 10-aad iyo ilaa intay ka gaarayaan 17 sanno jir, waxaa jira fursado fara badan oo isbebedeli kara ee ardayda si ay u dhammeystaan dugsiga.

## Si shirko ah u shaqeynta

Wasaaradda Waxbarashada NSW wuxuu aqoonsanayaa uwada shaqeynta si iskaashi leh ardayda iyo qoysaskooda waa sida ugu wanaagsan ee lagu taageerayo imaanshaha joogtada ee dugsiga ardayda.

Waxaan dhowraynaa ula shaqeynta si shirko ah adiga si loo taageero ilmahaagu inuu fuliyo fursadahooda nololeed.

## Adeega turjumaanka taleefanka

Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah. Haddii aad u baahan tahay caawimaad turjumaan si ay ula xiriiraan dugsiga, fadlan wac 131 450, u sheeg luuqada aad u baahan tahay oo weydii xiriiriyuhu inuu taleefan u diro dugsiga. Xiriiriyaha ayaa soo gelinaya turjumaan khadka taleefanka si uu kaaga caawiyo wadahadalkaaga. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.